

## **Isbeddelka Qeexista Fasiixnimada Luuqadda Ingiriisida ee Maine: Hage loogu Talogalay Ardayda iyo Qoysaska**

Dhawaan Waaxda Waxbarashada Maine waxay shaacisay in ardayda keenta heerka fasiixnimada 4.5 ama ka badan ACCESS marka la eego ELLs ahaan maayaan ardayda Ingiriisida barata. Kan waa isbeddel marka la eego sannadkii hore, Waaxduna waxay jeelaan lahayd inay u sheegto ardayda iyo qoysaskooda sababta go'aankan loo qaataay.

Sida uu dhigayo sharciga federaalku, gobol kastaa wuxuu go'aamiyaa sida uu u qeexi lahaa fasiixnimada luuqadda Ingiriisida. Marka si kale loo dhigo, Waaxda Waxbarashada Maine waxay go'aamisay buundada ACCESS marka la eego ELLs ee ay tahay in ardayda barata Ingiriisidu ay gaadhaan si ay u soo afjaraan barnaamijka Barashada Luuqadda Ingiriisida. Buundadan waa inay ahaato heerka saxda ah si loo hubiyo in ardaygu uu leeyahay xirfado Ingiriisida tacliinta ah si uu u guulaysto dugsiga la'aanta taageerada ESL.

Barigii hore, Maine wuxuu ahaa gobolka kaliya ee ardayda Ingiriisida barata ay u baahnaayeen inay keenaan heer fasiixnimo oo ah 6.00 (buundada ugu badan ee imtixaanka) si ay u soo afjaraan barnaamijka ESL. Intaa kadib 2017, nidaamka buundo bixinta ACCESS marka la eego ELLs ayaa isbeddelay, waxayna noqotay wax adag in la gaadho 6.0. Wakhtigaas, Maine waxay hoos u dhigtay qeexisteeda fasiixnimada luuqadda Ingiriisida waxayna ka dhigtay 5.0, taasi oo ugu dhawaan la mid ahayd xagga ardaygga 6.0 siduu ahaa.

Sanadkan Waaxdu waxay u fiirsatay sida ardayda Ingiriisida barata ahaayeen qiimaynahayaga tacliineed ee Gobolku rabo (eMPowerME iyo SAT) oo leh buundooyin kala duwan ACCESS. In kalabadh wax yar ka badan oo keenay 4.5 ACCESS ay buuxiyeen ama dhaafeen filashooyinka gobolka ee Fanka Luuqadda Ingiriisida ee qiimaynahaa tacliineed ee Gobolku rabo, taasi oo qiyaastii la mid ah sida ardayda aan ahayn EL ay ahaayeen. Taasi waxay muujisay in markii ardaygu uu gaadho 4.5 ACCESS, heerka Ingiriisida ardaygu aanu caqabad ku ahayn barashadiisa.

Kadib markii ardayda Ingiriisida barata soo afjaraan barnaamijka ESL, macallimiinta ardaygu waxay aad ula socdaan heerka waxqabadka tacliineed ee ardayga muddo laba sano ah, oo haddii ardaygu wali u muuqdo inuu u baahan yahay taageerada ESL, waa waajib in loo fidiyo. (Waxaad ogaataa in xaaladaha noocan ah ardaydu ayna gali doonin ACCESS mar labaad.) Sidoo kale, qaar ELs-ka kamid ah oo hore waxay sii wadi karaan baahida ay u qabaan taageerada tacliineed si ay awoddooda u muujiyaan, waana in tacliin ahaan la taageero iyadoo la adeegsanayo barnaamijyo iyo adeegyo la mid ah kuwaasi oo ardayda oo dhan ay mutaysan karaan (sida RtI, Title I, iyo Waxbarashada Gaarka ah).

Haddii ardaygaaga dhawaan loo aqoonsaday EL leh buundo ah 4.5 WIDA Screener Online, ardaygaagu sii ahaan maayo EL. (Hase yeeshi, haddii ardaygu uu hore u galay ACCESS oo aanu keenin ugu yaraan 4.5, ardaygu wuxuu ku sii jiri EL ilaa uu gaadho 4.5 ama ka badan ACCESS.)

Iyada oo aan la eegin buundada ardayga ee ACCESS, ardayda oo dhan waa in fursad loo siiyo inay bartaan wax ku habboon fasalkooda iyo inay la siiyo kalaasyo adag oo u diyaariya inay ka qalinjabiyaan dusgiga sare iyagoo u diyaarsan inay galaan kuuliyad ama shaqo bilaabaan. Ahaanshaha EL kuma aha caqabad kaqaybqaadashada buuxda ee tacliinta dugsiga ama barnaamijyada manhajka ka baxsan.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo kusaabsan waraaqdan, fadlan i soo wac ama iimeyl ii soo dir.

*April Perkins*

Agaasimaha ESOL/Barnaamijyada Labada Af & Title III

23 State House Station

Augusta, ME 04333

Xafiiska: (207)624-6627

Taleefanka Gacanta: (207)441-9043

[april.perkins@maine.gov](mailto:april.perkins@maine.gov)

